# WASAARADDA AMNIGA GUDAHA

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# WARSIDAHA BISHA

## AGOOSTO 2026



mois.gov.so

## HORUDHAC

Warbixintani waxay soo koobaysaa hawlaha, kulamada iyo horumarrada muhiimka ah ee Wasaaradda Amniga Gudaha intii lagu jiray Agoosto 2026, iyadoo muujinaysa dadaallada socda ee lagu dhisayo hay’ado amni oo isku-duwan, hufan oo si wanaagsan ugu adeega shacabka Soomaaliyeed.

Intii lagu jiray bishan, Wasaaraddu waxay xoogga saartay xoojinta isku-duwidda hay’adaha amniga, diyaar-garowga Shirweynaha Qaran ee Amniga Gudaha 2026, horumarinta awoodda ciidamada, isla-xisaabtanka hay’adaha iyo xoojinta iskaashiga caalamiga ah. Waxaa sidoo kale la qabtay kulamo iyo wadatashiyo lagu dardargelinayo qorshayaasha shaqo iyo dib-u-eegista waxqabadka Wasaaradda.

Bisha Agoosto 2026, Wasaaradda Amniga Gudaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya waxay sii wadday dadaallada lagu xoojinayo amniga gudaha, tayeynta hay’adaha amniga, isku-duwidda dowladda iyo horumarinta wada-shaqeynta hay’adaha iyo bah-wadaagta caalamiga ah.

## Wasaaradda Amniga Gudaha oo martigelisay kulanka Agaasimayaasha iyo wakiilada Warbaahinta iyo Xiriirka Dadweynaha ee Hay'adaha kala duwan ee Dowladda Federaalka



**Muqdisho, 22 Agoosto 2026:** Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Amniga Gudaha, Mudane Maxamed Shire, ayaa guddoomiyey kulanka joogtada ah ee Agaasimayaasha iyo wakiilada Warbaahinta iyo Xiriirka Dadweynaha ee Hay'adaha kala duwan ee Dowladda Federaalka, isagoo adkeeyey muhiimadda shaqada Guddiga iyo doorkiisa ku aaddan xoojinta isku-duwidda farriimaha dowladda.

Afhayeenka Xukuumadda ahna Agaasimaha Warbaahinta Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha, Mudane Cabdinaasir Axmed Bashiir, ayaa ka hadlay doorka Guddiga ee mideynta farriimaha iyo isku-duwidda xogaha ay hay'adaha dowladda u gudbinayaan bulshada.

Kulanka ayaa diiradda lagu saaray diyaarinta Bandhigga Waxqabadka Xukuumadda Dan-Qaran, iyadoo Agaasimeyaasha iyo Saraakiisha Warbaahinta Dowladda ay ka wada hadleen qorshaha, xogaha iyo farriimaha muhiimka ah ee la gudbinayo, iyo sidii loo xoojin lahaa wada-shaqeynta xafiisyada warbaahinta.

Waxaa sidoo kale laga wada hadlay habka loo soo bandhigayo waxqabadka Xukuumadda Dan-Qaran ee afartii sano ee la soo dhaafay, si loo helo farriimo mideysan oo si hufan loogu gudbiyo bulshada.

## Wasiirka Amniga Gudaha oo xafiiskiisa ku qaabilay Wakiilka cusub ee UNDP



**Muqdisho, 20 Agoosto 2026:** Wasiirka Amniga Gudaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Jeneraal Cabdullaahi Sheekh Ismaaciil (Fartaag), ayaa xafiiskiisa ku qaabilay Wakiilka cusub ee Barnaamijka Horumarinta Qaramada Midoobay (UNDP) ee Soomaaliya, Mudane Christophoros Politis.

Kulanka ayaa diiradda lagu saaray xoojinta iskaashiga Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo UNDP, gaar ahaan horumarinta adeegyada amniga iyo booliska, dardargelinta maalgelinta mashaariicda mudnaanta leh iyo horumarinta xalal waara oo wax looga qabanayo baahiyaha dalka.

Wasiirku wuxuu adkeeyey muhiimadda ay leedahay in la sii xoojiyo wada-shaqeynta Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo hay'adaha Qaramada Midoobay, si loo taageero horumarinta hay'adaha amniga, tayeynta adeegyada booliska iyo xaqiijinta amni waara.

Kulanka waxaa ka qayb galay Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Amniga Gudaha, qaar ka mid ah Agaasimeyaasha Waaxyaha Maamulka iyo Maaliyadda, iyo U-qeybsanaha Mashruuca Iskaashiga Booliska (JPP).

## Agaasimaha Guud oo guddoomiyey kulan ay yeesheen madaxda waaxyaha Isgaarsiinta iyo Warbaahinta



**Muqdisho, 19 Agoosto 2026:** Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Amniga Gudaha, Mudane Maxamed Shire, ayaa guddoomiyey kulan ay yeesheen madaxda waaxyaha Isgaarsiinta iyo Warbaahinta ee hay'adaha hoos yimaada Wasaaradda Amniga Gudaha iyo Wasaaradda Warfaafinta.

Kulanka ayaa looga hadlay diyaar-garowga iyo qorshayaasha warbaahineed ee ku aaddan Shirweynaha Qaran ee Amniga Gudaha 2026.

Ka qaybgalayaashu waxay isku raaceen in la xoojiyo wada-shaqeynta dhinacyada isgaarsiinta iyo warbaahinta, lana mideeyo qorshayaasha warbaahineed iyo wacyigelinta bulshada si loogu diyaar garoobo shirka.

## Agaasimaha Guud oo guddoomiyey shirka toddobaadlaha ah ee Agaasimeyaasha

**Muqdisho, 17 Agoosto 2026:** Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Amniga Gudaha, Mudane Maxamed Shire, ayaa guddoomiyey shirka toddobaadlaha ah ee Agaasimeyaasha Waaxyaha Wasaaradda.



Shirka ayaa looga hadlay hawlaha Wasaaradda, iyadoo si gaar ah diiradda loo saaray u diyaar-garowga Shirweynaha Qaran ee Amniga Gudaha 2026, kaas oo lagu qabanayo Muqdisho 1–2 Sebtembar 2026.

Agaasimeyaashu waxay soo bandhigeen qorshayaasha iyo hawlaha mudnaanta leh ee loo baahan yahay in la dardargeliyo, si Wasaaradda iyo hay'adaha ay khusayso ay ugu diyaar garoobaan shirka, una xaqiijiyaan qabsoomiddiisa si hufan.

## Wasiirka Amniga Gudaha oo soo xiray tababarka Dufcadda 5-aad ee Ciidanka Darawiishta



**Muqdisho, 13 Agoosto 2026:** Wasiirka Amniga Gudaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Cabdullaahi Sheekh Ismaaciil (Fartaag), ayaa soo xiray tababarka Dufcadda 5-aad ee Ciidanka Darawiishta Soomaaliyeed.

Tababarka ayaa lagu baray ciidamada anshaxa iyo hab-dhaqanka ciidanimo, fulinta hawlgallada khatarta badan, maaraynta hubka iyo ilaalinta xuquuqda aadanaha.

Sidoo kale, ciidamada waxaa la baray hababka gargaarka loogu fidiyo ciidanka iyo shacabka waxyeelladu ka soo gaarto goobaha dagaalka, iyo sidii ay si hufan uga hawlgeli lahaayeen xaaladaha kala duwan.

Tababarku wuxuu qayb ka yahay dadaallada lagu xoojinayo tayada iyo awoodda Ciidanka Darawiishta Soomaaliyeed. Wasiirku wuxuu ciidamada kula dardaarmay inay ilaaliyaan sharafta iyo anshaxa ciidanka, dhowraan sharciga, isla markaana waajibaadkooda qaran u gutaan si daacadnimo iyo masuuliyad leh.

## Kulan wadatashi ah oo loogu diyaar-garobayo dib-u-eegista waxqabadka Wasaaradda Amniga Gudaha



**Muqdisho, 5 Agoosto 2026:** Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Amniga Gudaha, Mudane Maxamed Shire, ayaa guddoomiyey kulan wadatashi ah oo lagu eegayey diyaar-garowga booqashada dib-u-eegista waxqabadka Wasaaradda.

Kulanka waxaa ka qayb galay Ku-Xigeenka Xoghayaha Joogtada ee Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha XFS, Mudane Cabdirisaaq Ibraahim, Agaasimaha Guud ee Xafiiska Amniga Qaranka, Mudane Cabdi Maalik Cabdullaahi, iyo mas'uuliyiin kale oo ka socday hay'adaha Dowladda Federaalka Soomaaliya. Waxaa la isku raacay in la xoojiyo wada-shaqeynta iyo isku-duwidda diyaar-garowga.

Booqashadu waxay diiradda saartay dib-u-eegista heerka fulinta Qorshaha Hawlqabadka Sanadlaha ah ee Wasaaradda, qiimeynta horumarka la gaaray iyo diyaar-garowga kulamada la xiriira waxqabadka Dowladda, iyadoo ujeeddadu tahay xoojinta isla-xisaabtanka, hufnaanta iyo tayada shaqada hay'adaha amniga gudaha.

## Agaasimaha Guud oo soo xiray shir laba maalmood socday oo lagu xoojinayay maamulka iyo isku-duwidda qaybta amniga



**Muqdisho, 4 Agoosto 2026:** Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Amniga Gudaha, Mudane Maxamed Shire, ayaa soo xiray shir laba maalmood socday oo lagu falanqeeyey sidii loo xoojin lahaa maamulka, isku-duwidda iyo isla-xisaabtanka hay'adaha amniga.

Shirka waxaa ka qayb galay mas'uuliyiin iyo khubaro ka socday hay'adaha amniga, waxaana diiradda lagu saaray dib-u-eegista caqabadaha jira, horumarinta wada-shaqeynta hay'adaha iyo dejinta tallaabooyin wax ku ool ah oo kor loogu qaadayo hufnaanta iyo isku-duwidda qaybta amniga.

Xiritaanka shirka, Agaasimaha Guud wuxuu adkeeyey in talooyinka iyo go'aannada kasoo baxay shirka loo beddelo qorshayaal la taaban karo oo xoojiya wada-shaqeynta hay'adaha amniga iyo adeegga ay u hayaan shacabka Soomaaliyeed.

## Agaasimaha Guud oo shir-guddoomiyey kulan loogu diyaar-garoobayo Shirweynaha Qaran ee Amniga Gudaha




**Muqdisho, 3 Agoosto 2026:** Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Amniga Gudaha, Mudane Maxamed Shire, ayaa shir-guddoomiyey kulan loogu diyaar-garoobayo Shirweynaha Qaran ee Amniga Gudaha 2026, kaas oo lagu qabanayo Muqdisho 1–2 Sebtembar 2026.

Kulanka ayaa diiradda lagu saaray xoojinta wada-shaqeynta hay'adaha ay khusayso, kala caddeynta waajibaadka, iyo horumarinta isku-duwidda, kormeerka iyo isla-xisaabtanka, si loo xaqiijiyo hannaan amni oo mideysan oo si hufan ugu adeega shacabka Soomaaliyeed.

Kulanka waxaa ka qayb galay Senator Maxamed Cabdi Cusmaan Majiino oo matalayey Guddiga Difaaca iyo Amniga ee Labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, madax ka socday hay'adaha amniga ee hoos yimaada Wasaaradda Amniga Gudaha, oo ay ka mid yihiin Ciidanka Booliiska Soomaaliyeed, Hay'adda Nabad Sugidda iyo Sirdoonka Qaranka (NISA), Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda (ICA), Hay'adda Maareynta Miinooyinka iyo Walxaha Qarxa (SEMA), iyo wakiillo ka socday Wasaaradaha Cadaaladda iyo Gaashaandhigga.

Shirweynuhu wuxuu la filayaa inuu xoojiyo isku-duwidda hay'adaha amniga iyo horumarinta maamulka waaxda amniga gudaha, si loo taageero amniga, xasilloonida iyo dowlad-dhiska Soomaaliya.

## Agaasimaha Guud oo kulan la yeeshay Madaxa Xafiiska IOM Somalia



**Muqdisho, 2 Agoosto 2026:** Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Amniga Gudaha, Mudane Maxamed Shire, ayaa kulan la yeeshay Madaxa Xafiiska IOM Somalia, Mudane Manuel Pereira, si loo xoojiyo iskaashiga u dhexeeya Wasaaradda iyo IOM.

Kulanka ayaa diiradda lagu saaray maamulka socdaalka, ka hortagga tahriibka iyo socdaalka sharci-darrada ah, iyo kor u qaadidda wacyigelinta bulshada ee khataraha tahriibka. Sidoo kale, waxaa laga wada hadlay taageeridda dadaallada xasilinta deegaannada laga xoreeyey argagixisada, dib-u-soo-kabashada bulshada iyo xoojinta amniga dalka.

Labada dhinac waxay isku raaceen in la sii ambaqaado wada-shaqeynta iyo hirgelinta barnaamijyo wax ku ool ah oo taageeraya amniga, xasilloonida iyo horumarka Soomaaliya.

## Agaasimaha Guud oo guddoomiyey shir ay isugu yimaadeen hay'adaha amniga



**Muqdisho, 2 Agoosto 2026:** Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Amniga Gudaha, Mudane Maxamed Shire, ayaa guddoomiyey shir ay isugu yimaadeen hay'adaha amniga si loo dardargeliyo u diyaar-garowga booqashada guddi ka socda Qaramada Midoobay ee la xiriira arrimaha xakameynta hubka.

Kulanka ayaa lagu qiimeeyey heerka diyaar-garowga hay'adaha, iyadoo dib loo eegay xogihii iyo arrimihii farsamo ee hore loo wadaagay.

Booqashadu waxay qayb ka tahay wada-shaqeynta Soomaaliya iyo Qaramada Midoobay ee ku aaddan fulinta waajibaadka caalamiga ah ee la xiriira maamulka hubka iyo amniga.

WASAARADDA AMNIGA GUDAHA SOOMAALIYA
MINISTRY OF INTERNAL SECURITY SOMALIA
وزارة الأمن الداخلي الصومال
MOIS

info@mois.gov.so
www.mois.gov.so

Via Tanzania 888 Building,
Mogadishu, Somalia

MoisJFS

mois_fgs